

## Martiiqaad lagu baadho kansarka mindhicirka

Dhammaan muwaadiniinta Danmark ee da'doodu u dhaxayso 50 iyo 74 sano waxa lagu martiiqaadayaa baadhitaanka kansarka mindhicirka labadii sanaba mar. Halkan waxaad si kooban uga akhriyi kartaa wuxuu ka kooban yahay. Baadhitaanka kansarka mindhicirku wuxuu soo saari karaa isbadellada (Nudaha kansarka mindhicirka) iyo kansarka mindhicirka oo goor hore laga hortagi karo, ayado oo jirto fursad fiican oo lagu dawayn karo, laguna caafimaadi karo. Ka qaybgelistu waa ikhtiyaari waana lacag la'aan.

## Sidee uga qaybgelaysaa?

Waxa boosta kuugu imaanaya waraaq ay la socoto dhuun yar oo balaastig ah iyo burush yar oo aad u adeegsaneyso qaadista saxarada. Waraaqda waxa kaloo ku jira galka jawaabta oo tikidhaysan. Markaad qaaddo saxarada, ku rid galka oo boosta ku dir. Xusuuso inaad barta qoraalka ku dul qorto cpr-nummerkaaga. Saxarada tijaabada ah waxaa shaybaadgka lagaga baadhaaya dhiig ili-ma-aragto ah.

Sida loo qaado saxarada, waxaad ka akhrisan kartaa ayado oo af Soomali ah halkan: [LINK](#)

**Iska sug inaad saxarada iska qaaddo, haddii aad safrayso.**

## Jawaabta baadhitaanka saxarada

Jawaabta baadhitaanka saxarada waxay ku imanaysaa e-Box ama warqad. Dhakhtarkaadana sidoo kale wuxuu helayaa jawaabta baadhitaanka. Haddii baadhitaanka lagu arko raad dhiig, waxa cusbataallada midkood lagaaga samaynayaa ballan, si mindhicirka loogu baadho kamarad (koloskopi).

Haddii aanu jirin raad dhiig ah, waxaad heli doontaa martiiqaad cusub oo la xidhiidha baadhitaanka kansarka muddo ilaa laba sano ku siman. Haddii aad muddadaa u dhaxaysa isku aragto astaamaha kansarka mindhicirka, sida tusaale ahaan, dhiig ama dheecaan ama xab aad ku aragto saxarada, waa inaad la xidhiidho dhakhtarkaaga - xataa haddii aad heshay jawaabta la xidhiidha baadhitaanka saxaradaada.

## Su'aalo ma qabtaa?

Haddii aad su'aalo qabto ama tusaale ahaan uu kuu socdo baadhitaan la xidhiidha cudur mindhicirka ah, waxaad soo wici kartaa, ama aad qoraal u soo diri kartaa xoghaynta baadhitaanka (screeningssekretariatet) ee gobolkaaga. Haddii aanad rabin inaad ka qaybgasho baadhitaanka, waxaad la soo xiriirkartaa isla xoghaynta.

Salaan sharaf leh,

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Nordjylland, tel.: 97 64 17 12

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Midtjylland, tel.: 78 42 01 70

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Syddanmark, tel.: 79 40 67 85

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Sjælland, tel.: 56 51 28 28

Xoghaynta baadhitaanka ee gobolka Hovedstaden, tel.: 38 67 17 17